# Gudaha Norway sidaan ayaad ugu isticmaali kartaa shahaadada koroonaha

Shahaadada koroonaha ayaa la billaabayaa in waddanka gudihiisa la isticmaalo marka la galo heerka 3-aad ee qorshaha dawladda ee dib u furidda dalka. Waxaa markaas shahaadada koroonaha lagu isticmaali karaa qabanqaabooyinka waaweyn iyo doomaha dalxiiska ee xeebaha waddanka gudihiisa. Marka qabanqaabooyinka waaweyn la joogo tijaabada qofka koroonaha laga waayay waxay u dhigantaa tallaal ama qof uu covid-19 ku dhacay oo difaacan.

- Waxaan soo marnay muddo dheer oo aysan dad badani kulmi karin si ay u wadaagaan dhacdooyinka waaweyn. Hadda ayaan helaynaa faa'iidadii taxaddarka, iyo midda in ay sii badanayaan dadka tallaalan. Shahaadada koroonaha ayaa durba hadda laga isticmaalaa xudduudaha. Haddana waxaan billaabaynaa in aan ku isticmaalno qabanqaabooyinka waaweyn iyo doomaha dalxiiska xeebaha ee waddanka gudihiisa. Taas oo micnaheedu yahay in aan mar dhaw aadi karno ruwaayadaha waaweyn, tiyaatarrada, ciyaaraha kubbadda cagta iyo feestooyinka. Tani waa tillaabo muhiim ah oo dib loogu noqonayo maalmihii caadiga ahaa, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Shahaadada koroonuhu wax bay fududeynaysaa, ee wax ma xaddidayso. Mabda' muhiim oo dawladda u yaalla ayaa ah in shahaadada koroonuhu faa'iido u horseeddo dadka oo dhan – oo xataa kuwa aan difaacnayn. Xeerka guud waa in tijaabada koroonaha lala mid dhigo tallaalka iyo qofka covid-19 ku dhacay ee difaacan.

- Tijaabada koroonuhu waxay wax ka sheegaysaa wakhti gaaban. Sidaas darteed ayay tijaabadu 24 saac oo keliya uga shaqaynaysaa shahaadada koroonaha. Qabanqaabiyayaashu waa in ay heshiis la galaan shirkadaha qaada tijaabada

degdegga ah, si ay suurtaggal u noqoto in natiijada tijaabada la geliyo shahaadada koroonaha. Waxaan shardi ka dhigaynaa in qabanqaabooyinka waaweyn ay ka-qaybqaatayaashu ogeysiiyaan meesha tijaabada looga qaadi karo, ayuu yiri Høie.

Si loo kordhayo tirada dadka la tijaabin karo waxay dawladdu ku hawlan tahay in la sameeyo nidaam ay shirkado gaar loo leeyahay qaadi karaan tijaabada shahaadada koroonaha, lacagta ku baxdana ay dawladdu u celiso. Markaas dawladda ayaa bixinaysa kharashka tijaabadada, oo lagu dallici maayo qabanqaabiyaha iyo ka-qaybqaataha midna.
- Taas oo micnaheedu yahay in badanka dadka u baahan in tijaabo laga qaado si ay u helaan shahaado cagaar ah, ay tegi karaan goob tijaabada lagu qaado – tijaabooyinkaan waxaa loo qaadayaa hab degdeg ah oo jawaabtu dhakhso u soo baxayso wakhti fiican qabanqaabada ka hor. Annaga iyo wasaaradda dhaqanka ayaa wadajir shir ugu yeeri doonna ganacsatada. Waxaanan halkaas uga jawaabi doonnaa dhammaan su’aalaha ay ka qabaan qabanqaabooyinka, tijaabada iyo hubinta shahaadada koroonaha si ay u billaabaan in ay wax qorsheeyaan, ayuu yiri Høie.

Shahaadada koroonuhu cagaar ayay noqonaysaa haddii aad tallaal buuxa qaadatay, haddii ay saddex toddobaad ka badan ka soo wareegtay markii aad qaadatay cirbaddi koowaad ee tallaalka, haddii uu kugu dhacay covid-19 ama haddii wax ka yar 24 saac hortood tijaabo lagaa qaaday oo cudurka lagaa waayay.

Shahaadada koroonaha waxaa isticmaalkeeda la billaabayaa marka la galo heerka 3-aad ee qorshaha dib u furidda dalka.
Isticmaalka shahaada koroonaha wuxuu istaagayaa marka heerka kala qaadista cudurka iyo tallaalku sheegaan in aan xayiraad loo baahnayn.

**Isticmaalka shahaadada koroonaha ee degmooyinka ay ka jiraan tillaabooyin adag oo ku meelgaar ah**
Dawladdu ma oggolaanayso in shahaadada koroonaha loo isticmaalo in wax loo fududeeyo degmooyinka u baahan tillaabooyinka heerarka ugu adag, kuwaas oo ah tillaabooyinka 5A. Tillaabada heerkaan waxaa lagu soo rogaa degmooyinka

cudurku ugu dhex faafayo si aan la xakamayn karin, ee loo baahan yahay in dhaqdhaqaaqa dadka loo yareeyo sida ugu badan ee suurtaggalka ah.

Degmooyinka ay ka jiraan tillaabooyinka aan aadka u adkayn ee ah 5B iyo C, iyagaa go'aan ka gaari kara in shahaadada koroonaha loo adeegsado in ay furnaan karaan jirdiinooyinka dalxiiska ee dibedda ah, madxafyada, shaleemooyinka, tiyaatarrada iyo goobaha la midka ah ee dhaqanka iyo madaddaalada.

Waxay sidoo kale go'aan ka gaari karaan in shahaadada koroonaha loo adeegsan karo qabashada qabanqaabooyinka dadweynaha ayada oo tirada dadku xaddidan tahay oo ay noqonayso in la mid ah midda heerka 2-aad ee qorshaha dib u furidda bulshada. Taas oo ah ilaa iyo 400 oo qof (200x 2 kooxood oo joogto ah) oo aan lahayn goobo la fadhiisto oo joogto ah oo loo tilmaamayo, laakiin waxay noqonayaan 1000 qof (200 x 5 kooxood oo joogto ah) haddii ay dhammaan fadhiyaan goobo joogto ah oo loo tilmaamay.

Degmooyinka ay ka jiraan tillaabooyinka 5B iyo C, waxay sidoo kale go'aamin karaan in carruurta iyo dhallinyarada ka yar 12 sano ay geli karaan tiyaatarrada, shaleemooyinka iyo matxafyada haddii ay la socdaan qof weyn oo haysta shahaado koroone oo shaqaynaysa. Waa xaddidan tahay inta ilmood ee la socon kara halkii qof ee weyn ba.

**Xaddidaadda tirada dadka ee qabanqaabooyinka dadweynaha ee waaweyn:**

**Heerka 3-aad:**
Heerka 3-aad waxaa dhammaan qabanqaabooyinka adeegsada tijaabada ama shahaadada koroonaha shuruud looga dhigayaa in la buuxiyo keliya boqolkiiba 50 inta meeshu qaaddo, iyo in ka-qaybqaatayaasha loo kala qaybiyo kooxo midkiiba yahay ilaa iyo 500. Sidaas ayay suurtaggal ku noqonaysaa in la kala fogaado.

| | Gudaha | Dibedda |
|---|---|---|

| | | |
|---|---|---|
| **La haysto tijaabo ama shahaado koroone** | | |
| Goobo joogto ah oo la isu tilmaamay | 50 % inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 2500 oo qof (500 x 5 kooxood oo joogto ah) | 50 % inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 5000 oo qof (500 x 10 kooxood oo joogto ah) |
| Aan lahayn goobo joogto ah | 50 % inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 1000 qof (500 x 2 kooxood oo joogto ah) | 50 % inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 2000 oo qof (500 x 4 koooxood oo joogto ah) |
| **Aan la haysan tijaabo ama shahaado koroone** | | |
| Goobo joogto ah oo la isu tilmaamay | Ilaa iyo 1000 qof (500 x 2 kooxood oo joogto ah) | Ilaa iyo 2000 oo qof (500 x 4 kooxood oo jooghto ah) |
| Aan lahayn goobo joogto ah | Ilaa iyo 400 oo qof (200 x 2 kooxood oo joogto ah) | Ilaa iyo 800 oo qof (200 x 4 kooxood oo joogto ah) |

### Heerka 4-aad:

| | **Gudaha** | **Dibedda** |
|---|---|---|
| **La haysto tijaabo ama shahaado koroone** | | |
| Goobo joogto ah oo la isu tilmaamay | 75% inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 5000 oo qof | 75% inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 10 000 oo qof |
| Aan lahayn goobo joogto ah oo la isu tilmaamay | 75% inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 2500 oo qof | 75% inta meeshu qaaddo ugu badnaanna 5000 oo qof |
| **Aan la haysan tijaabo ama shahaado koroone** | | |
| Goobo joogto ah oo la isu tilmaamay | Ilaa iyo 2500 oo qof | Ilaa iyo 5000 oo qof |
| Aan lahayn goobo joogto ah | Ilaa iyo 750 | Ilaa iyo 1500 oo qof |

### Xaddidaadda tirada carruurta ka yar 18 sano ee qabanqaabooyinka

Qabanqaabooyinka waaweyn carruurta iyo dhallinyarada ka yar 18 sano lagama dhaafayo shahaadada koroonaha iyo tijaabada. Waalidka carruurta da’da yar ayaa shahaadada koroonaha tusi kara haddii ay carruur la socoto.

- Xaddidaadda tirada dadka ee qabanqaabooyinku ma adka heerka 3-aad xataa haddii aan la haysan shahaadada koroonaha. Tusaale ahaan qabanqaabooyinka gudaha ka dhacaya ee aan dadku haysan goobo joogto ah waxaa ka qaybqaadan kara 400 oo qof, haddii ay dibedda ka dhacayaanna 800 oo qof. Taas oo ka dhigan in ay carruurta iyo dhallinyaradu ka qaybqaadan karaan qabanqaabooyin badan ayada oo aan loo baahnayn shahaado koroone, ayuu yiri Høie.

**Xaddidaadda tirada dadka ee doomaha dalxiiska xeebaha**
Qabanqaabooyinka ka sokow, waxaa shahaadada koroonaha loo adeegsan doonaa doomaha dalxiiska xeebaha waddanka gudihiisa. Haddii ay dad aan difaacnayn soo raacaan doon ay dad badan saaran yihiin waxay taasi sare u qaadaysaa halista loogu jiro in uu cudurku doonta ka dhex dillaaco.

- Khibradda aan ka barannay sanadkii hore ayaa na faraysa in aan taxaddarno maxaa yeelay way adkaan kartaa in la maareeyo marka uu cudurku doomaha ka dillaaco. Sidaas darteed waxaa doomaha dalxiiska xeebaha loo oggolaanayaa in ay kordhiyaan tirada dadka haddii dadka doonta raacaya ay caddeeyaan in ay difaacan yihiin iyaga oo taas ku caddaynaya shahaadada koroonaha. Tirada dhabta ah dib ayay dawladdu ka soo sheegi doontaa, ayuu yiri Høie.

Waxaad difaacan tahay marka aad qaadatay tallaal buuxa, ama aad hal cirbad oo tallaal ah qaadatay saddex ilaa 15 toddabaad hortood ama covid-19 kugu dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay.